

Istareexa Kor u Aqrinta

Waxaa jiro sababo badan oo buugaagta kor loogu aqriyo caruurta, laga bilaabo marka aay aad u yar yihiin lana sii wado wax badan ka dib marka aay iskood u aqrisan karaan. Waa waqti raaxo iyo isu-soo-dhowaansho leh, oo la wadaago xiiso laguna sahmiyo adduunka. Intaa waxaa dheer, khabiirada waxay ku taliyeen in 20 daqiiqo maalintii caruurta wax loo aqriyo aay hagaajineyso fursadaha aay dugsiga ku guuleysan karaan.

Waa kuwan hababka aad kaga faa'iideysan karto waqtigaaga aqriska badankiis.

Meesha laga bilaabay

Duleed ahaan meesha aad taagan tahay waxay ka turjumeysaa daneyntaada iyo xanaaneyntaada. Isla sin caruurta dhererkooda, kursiga dheer (sofa) ama sariirta isla fariista idinkoo hoosta isaga jira ama dhulka wada fariista.

Buuga da'da ilmaha ha ahaado

Ilmaha dareenadooda oo dhan, oo uu ku jiro dhadhaminta ayeey ku sahmiyaan buugaagta, marka dooro buugaagta ka sameysan marada iyo baakadaha oo u adkeysan kara gogo'a iyo dhamaashaha. Marka dambe, dhalaanka laba jirada ah waxay daneeyaan in aay magacaabaan sheeyada ku jira buugaagta ee boggi walba halka sawir leh. Si tartiib-tartiib ah ayeey caruurta sheekooyinka buugaagta ku qoran u sahmiyaan, marka hore kuwa fudud, ka dib kuwa taxan ee dhaadheer iyo kuwa dhibka badan. Ugu dambeyn, laga yaabee in aad aqrisaan buugaagta dhaadheer maalmo ama xitaa toddobaadyo, markiiba hal cutub.

Raac xiisahooda

Doorro buug ku haboon da'da iyo xiisaha ilmaha. Caruurta yaryar laga yaabee in aay ka xiiso dhacaan inta aadan gaarin bogga ugu dambeeya ka hor. Waa OK. Hadafka waa in aqriska madadaalo laga dhigo, ee ma ahan in la gaaro buugga dhamaadkiisa.

Da'da iyo qoraalka is-laheysii

Buugga waxaad lahayiin kartaa da'da ilmaha aad u aqrineyso. Caruurta yaryar, isku day in aad u tilmaanto sawirka ama sheekada uga sheekeyso. Waxaad kaloo ku bedeli kartaa magacyada jilayaasha magacyo dad uu ilmaha garanayo.

Maskaxda ilmaha soo jiido

Midabada iftiimaya iyo sawirada fasiixa ah ayeey caruurta xiiseeyaan. Waxaad ku heyn kartaa maskaxda ilmaha buugaagta leh qeybo dhaqaaqa – qeybo kaca, muuqaalo soo booda, cadad dhex gela duleelo. Raac waxa aad ogtahay in aay xiiseeyaan: dhaqdhaqaaq aay ku raaxeystaan, xayawaan soo jiita.

Aqriska ka dhig mid la jilayo

Marka aad ka dhigto aqriskaaga mid la jilayo caruurta xiisahooda sheekada ayaad ceshaneysaa. Culeyska saar luuqda heesaha xanaanada caruurta. Isticmaal dhaqdhaqaaqa gacmaha oo tilmaan waxa aad sawirka kaga hadleyso. Jilayaasha kala duwan ee sheekada codkaaga u kala bedel xayawaankana cod u samee. Ku dhiirgeli caruurta in aay kugu daydaan oo aay madadaalada kaqeyb-galaan.

Caruurta mashquuli

Marka caruurta sheekada aay hore u maqleen dhowr jeer, waad kara qeybgelin kartaa adigoo hakinaya si aay u buuxiyaan erayada ka maqan. Sheekooyinka qaar waxay leeyihiin joogsiiyo fududeeynaya tan, erayo soo noqnoqda oo caruurta aay kugula celceliyaan. Ilmaha in aad u ogolaato in uu rogo bogga oo kaliya ayuu mashquul ugu noqon karaa sheekada.

Su'aalo weydii

Mar mar, jooji oo weydii su'aalo ku saabsan sawirada ama sheekada. Xitaa ilmaha inta uusan hadalka bilaabin ka hor waxaad weydiin kartaa, "Ma arki kartaa halka eey-duureedka uu ku dhuumanayo?" Haddii ilmaha uu baranayo tirada, waxaad weydiin kartaa "imisa bisadood ayaad ku arki kartaa bogan?" Caruurta waaweyn soo geli howsha adigoo weydiinaya, "Maxaad u maleyneysaa in aay dhici doonaan haddii gabarta yar aay furto albaabka?"

Su'aalaha ka jawaab

Waqti sii in aad ka jawaabto su'aalaha caruurta sidoo kale. Caruurta aan weli garaneyn in aay eray yiraahdaan, tilmaanta aay farta ku fiqaan sawirka waxaa dhici karta in aay su'aal tahay. Ku jawaab in aad sheegto magaca waxa aay tilmaamayaan. Caruurta waaweyn waxay ku weydiin karaan sababta jilaha uu wax u sameeyey. Haki aqriskaaga si aad uga wadahadashaan fikradahooda.

Ku celi-celi

Caruurta waxay jecel yihiin in isla buugii lagu soo celceliyo – taasoo dhibta dadka waaweyn oo jeclaan lahaa xoogaa waxyaabo kala duwan. U samir sheeyadan aad garaneyso ku soo celcelintooda. Ku celcelinta waa qeyb ka mid ah sida caruurta erayada u bartaan, fikradaha iyo sheekada buugga.

Sii wad

Marka caruurtaada aay iskood wax u aqrisan karaan, wax ayaad isu aqrin kartaan idinkoo kaltamaya. Dareenada wanaagsan ee ka yimaada waqtiyadan la wadaagayo raaxada buugaagta sannado badan ayeey jiri doonaan.

Waxaa qoray Betsy Mann

Les plaisirs de la lecture à haute voix

Il y a plein de raisons de regarder des livres et de les lire à haute voix aux enfants, à partir d'un très jeune âge et continuant bien après qu'ils peuvent lire eux-mêmes. C'est l'occasion de passer ensemble des moments de détente et d'intimité, de partager des intérêts et d'explorer le monde. En outre, les experts suggèrent que lire aux enfants 20 minutes par jour contribue grandement à leur succès scolaire.

Voici quelques suggestions pour tirer profit de votre temps de lecture.

La position du départ

Votre position physique communique votre intérêt et votre affection. Placez-vous à la hauteur de l'enfant, câlinant ensemble sur le sofa ou le lit ou assis par terre.

Choisir le livre selon l'âge

Les bébés explorent les livres à travers tous les sens, incluant le goût, alors choisissez les livres cartonnés ou en tissu qui résisteront à cet usage. Plus tard, les tout-petits s'intéressent à nommer les choses dans les livres qui ont une image par page. Les enfants apprennent graduellement à écouter les histoires dans les livres. D'abord ils aiment les histoires très simples; ensuite, peu à peu, ils prennent goût à des histoires plus complexes et longues. Éventuellement, vous pourrez lire de plus longs livres, étalés sur des jours ou même des semaines, un chapitre à la fois.

Suivre leurs intérêts

Choisissez un livre selon l'âge et les intérêts des enfants. Les plus petits perdent souvent l'intérêt avant d'arriver à la dernière page. C'est normal. Le but est de prendre plaisir à la lecture, pas nécessairement de finir le livre.

Adapter le texte

Vous pouvez adapter le texte à l'âge des enfants auxquels vous lisez. Pour les très jeunes, décrivez simplement les images ou contez l'histoire dans vos propres mots. Vous pourriez même changer les noms des personnages en substituant les noms des personnes connues par les enfants.

Attirer leur attention

Les enfants sont attirés par les couleurs vives et les illustrations claires. Vous pouvez intéresser un enfant qui bouge beaucoup en lui offrant des livres qui bougent aussi : des rabats qu'on lève, des scènes en trois dimensions, des morceaux que l'on glisse dans des fentes. Partez de ce qui l'intéresse déjà : une activité qu'il aime, un animal préféré.

Rendez votre lecture dramatique

Vous pouvez aussi maintenir l'intérêt en rendant votre lecture dramatique. Mettez l'emphase sur le rythme dans les comptines. Utilisez des gestes et pointez du doigt les images dont vous parlez. Changez votre voix selon les différents personnages et faites les sons des animaux. Encouragez les enfants à partager le plaisir en vous imitant.

Impliquez les enfants

Quand les enfants ont déjà entendu une histoire à plusieurs reprises, vous pouvez solliciter leur participation. Faites un petit arrêt pour leur permettre de dire les prochains mots. Certaines histoires ont un refrain qui facilite cette astuce, par exemple les paroles du loup qui menace de souffler sur les maisons dans « Les trois petits cochons ». Même laisser l'enfant tourner la page peut suffire pour le faire participer.

Poser des questions

De temps en temps, arrêtez pour poser une question au sujet des illustrations ou de l'histoire. Même avant qu'un enfant puisse parler, vous pouvez demander « Vois-tu où se cache le loup? ». Si un enfant apprend à compter, demandez « Combien de chats vois-tu dans l'image? ». Encouragez la réflexion chez les plus grands en demandant « Que penses-tu va arriver si Boucle d'or mange le gruau? ».

Répondre aux questions

Prenez le temps de répondre aux questions des enfants aussi. Chez les enfants qui n'ont pas encore beaucoup de mots, le fait de pointer une partie de l'illustration peut être une question. Répondez à son intérêt en nommant ce que pointe l'enfant. Les plus âgés voudront peut-être savoir pourquoi un personnage a fait quelque chose. Faites une pause dans la lecture pour discuter de leurs idées.

Encore et encore

Les enfants adorent entendre la même histoire encore et encore, au désespoir de plusieurs adultes qui préféreraient plus de variété. Soyez patient face à leur préférence pour ce qui est bien connu. La répétition permet à l'enfant de maîtriser les mots, les concepts et l'histoire contenus dans le livre.

Maintenez l'habitude

Une fois que vos enfants sont capables de lire seuls, vous pouvez lire à haute voix, chacun son tour. Les sentiments agréables de ces moments de plaisir, passés à partager des livres, se prolongeront pendant des années.

par Betsy Mann